

|   |     |
|---|-----|
| Cutubka 5aad: .....                               | 74  |
| Casharka 1aad: Geeduhu waa Nolosheenna.....       | 74  |
| Casharka 2aad: Biyahu waa Nolosheenna.....        | 80  |
| Casharka 3aad: Dhibaatada Qashinka.....           | 86  |
| Casharka 4aad: Abeeso iyo Dabagaalle .....        | 91  |
| Casharka 5aad: Ardaydii Dhulkeygoow ( hees).....  | 96  |
| Cutubka 6aad: .....                               | 99  |
| Casharka 1aad: Shinni iyo Duqsi.....              | 99  |
| Casharka 2aad: Noloshu waa Qorshe. ....           | 110 |
| Casharka 3aad: Jiheye.....                        | 115 |
| Casharka 4aad: Daacadi ma Hungowdo.....           | 121 |
| Casharka 5 aad: Warsame iyo Warmooge. ....        | 126 |
| Cutubka 7aad: .....                               | 131 |
| Casharka 1aad: Nebi Muxammed (NNKH) .....         | 131 |
| Casharka 2aad: Sayid Muxammed Cabdulle Xasan..... | 134 |
| Casharka 3aad: Shabeel iyo Laba Saaxiib. ....     | 140 |
| Casharka 4aad: Dawaco iyo Yaxaas.(sheeko) .....   | 143 |

## Cutubka 1aad: .....

### Casharka 1aad: Naqtiiin

### Waxqabadka 1aad.

Waxa aan akhrinayaa weerahaan hoos ku qoran. Waxa aan ku qorayaa weerahaan astaamaha hadalka sida: Joogsiga, Calaamadda su'aasha iyo Calaamadda la yaabka.

1. Geelle waa nin dheer
2. Goorma ayaad imaneysaa
3. Xasan waa wiil wanaagsan
4. Maanta iska joog.
5. Immisa wiil ayaa kula dhalatay
6. Sidee bay u dhacday arrintaasi
7. Wax yar i sug
8. Halkee ayaad u socotaa
9. Yaa kuu sheegay jawaabta
10. Faarax waa uu joogaa

## Waxqabadka 2aad.

Waxa aan isla doonanaynaa lidadka erayadaan.

adag buuran

kulul nadiif

taajir dheer

dhuuban qabow

gaaban jilicsan

qoyan qallalan

wasakh sabool

## Waxqabadka 3aad.

Waxa aan dhammaystirayaa bilaha hijriyada ah

1. Muxarram 7. \_\_\_\_\_

2. Safar 8. \_\_\_\_\_

3. Rabiicul - awal 9. \_\_\_\_\_

4. \_\_\_\_\_ 10. \_\_\_\_\_

5. \_\_\_\_\_ 11. \_\_\_\_\_

6. \_\_\_\_\_ 12. \_\_\_\_\_

## Waxqabadka 4aad.

b. Waxa aanna qerayaa magacyada bilaha soomaaliga, aniga oo raacaya tusaalahan:

### Tusaale:

|    |         |     |       |
|----|---------|-----|-------|
| 1. | Seko    | 7.  | _____ |
| 2. | Safar   | 8.  | _____ |
| 3. | Mowliid | 9.  | _____ |
| 4. | _____   | 10. | _____ |
| 5. | _____   | 11. | _____ |
| 6. | _____   | 12. | _____ |

t. Waxa aan sheegayaa bilaha miilaadiga ah ee ku dhammaada 30 waxaa kale oo aan sheegayaa bilaha miilaadiga ah ee ku dhammaada 31.

|    |       |     |       |
|----|-------|-----|-------|
| 1. | _____ | 6.  | _____ |
| 2. | _____ | 7.  | _____ |
| 3. | _____ | 8.  | _____ |
| 4. | _____ | 9.  | _____ |
| 5. | _____ | 10. | _____ |
|    |       | 11. | _____ |

## Waxqabadka 5aad.

Waxa aan ku buuxinayaa meelaha bannaan xarafka "h", dabadeedna waan akhrinayaa.

|               |                 |
|---------------|-----------------|
| 1. _____uuri  | 6. _____ees     |
| 2. _____oon   | 7. _____arag    |
| 3. _____abaar | 8. _____arimcad |
| 4. _____oos   | 9. _____aruur   |
| 5. _____abeen | 10. _____illaac |

## Casharka 2aad: Naqtiin

### Waxqabadka 1aad.

Waxa aan ka dhigayaa erayadaan keli, aniga oo raacaya tusaalahan:

#### Wadar

#### Keli

##### Tusaale:

1. miisas

miis

2. kuraas

3. libaaxyo

4. doonyo

5. bisado

6. maalmo

7. Fardo

8. riyoo

9. dawacooyin

10. beryo

## Waxqabadka 3aad.

### Yeeris

Baruhu waxa uu nee yeerinayaa weeraha hoos ku qoran.

- Xasan waxa uu dhigtaa fasalka Afraad, qoyska Xasan waxa ay hanti ahaan u leeyihiin dukaan weyn, beri hore qoyska Xasan waxa ay ahaan jireen sabool.
- Xasan waxa uu salaadda u kacaa aroor hore, isagu waa wiil firfircoon.
- Wuxuu ku fiican yahay ballanta.
- Wuxuu og yahay in ballan darro ay tahay diin-darro.

Miro gunti ku jira miro geed saaran looma daadsho

### Waxqabadka 3aad.

Waxa aan qorayaa jawaabaha weydiimaha soo socda, aniga oo raacaya tusaalahan.

1. Magacaa? maxamed
2. Xaggee ayaad ku nooshahay?
3. Yaad la nooshahay?
4. Maxaad barataa?
5. Yaa kugu caawiyo waxbarashada?

## Waxqabadka 4aad.

Waxa aan u beddelayaa weerahan soo socda weydiimo, aniga oo raacaya tusaalahan.

Tusaale: Biyo la'aan waa nolol la'aan

Maxee tahay biyo la'aan?

b. Biyuhu waa laf-dhabarta nolosha. \_\_\_\_\_

t. Nolosheenna waxa ay ku tiirsan tahay biyaha. \_\_\_\_\_

j. Biyo faro badan waxa ay keeni karaan dhibaato, marka ay daad yihii. \_\_\_\_\_

## Casharka 3aad: Naqtiin

### Waxqabadka 1aad.

Waxa aan ku buuxinayaa meelaha bannaan magac guud ama magac gaar ah.

b. fasalkeennu waxa uu ka kooban yahay \_\_\_\_\_  
iyo \_\_\_\_\_

t. \_\_\_\_\_ waa xayawaan xoog badan.

j. \_\_\_\_\_ waa gabar ku fiican waxbarashada.

x. \_\_\_\_\_ waxa ay ka mid tahay magaalooyinka waaweyn ee dekedaha leh.

kh. \_\_\_\_\_ iyo qiiqiisa waa la' isla tuuraa.

### Waxqabadka 2aad.

Waxa aan furayaa hal-xiraaleyaasha soo socda:

1. Ul qurux badan qaadan waa.
2. Saddex nin oo nin waalan sida.
3. Halmadow howd miratay.
4. Abtigay shansha gaab shir ka dhawaaq.
5. Mas barko maroodi kugu qooraarsey.

## Waxqabadka 3aad.

Erayadan kelida ah ayaan wadar ka dhigayaa,  
aniga oo raacaya tusaalahan:

1. abeeso abeeesooyin
2. maroodi \_\_\_\_\_
3. libaax \_\_\_\_\_
4. yaxaas \_\_\_\_\_
5. abaar \_\_\_\_\_
6. waddo \_\_\_\_\_
7. dubbe \_\_\_\_\_
8. beer \_\_\_\_\_
9. raad \_\_\_\_\_
10. jeeg \_\_\_\_\_

## Casharka 4aad: Naqtiin

### Waxqabadka 1aad.

Biyuhu waa laf-dhabarta nolosha.

Xoolaha, dadka iyo dhirtuba ma aysan jireen biyaha  
la'aantood, waxa aan sheegayaa ilaha biyaha, aniga  
oo raacaya tusaalaha:

### Tusaale:

- 1) Ceelasha.
- 2) \_\_\_\_\_
- 3) \_\_\_\_\_
- 4) \_\_\_\_\_
- 5) \_\_\_\_\_
- 6) \_\_\_\_\_
- 7) \_\_\_\_\_

### Waxqabadka 2aad.

Waxa aan magac u yaalladan ku buuxinayaa meelaha  
ay ku habboon yihiin:

(Iyagu, Idinku, Innagu, Adigu, Iyadu, Anigu)

1. \_\_\_\_\_ waa ay yimaadeen.
2. \_\_\_\_\_ waan imid.
3. \_\_\_\_\_ waa timaadeen.
4. \_\_\_\_\_ waa nimid.
5. \_\_\_\_\_ waa ay timid.

Waxa aan dhammaystirayaa weerahaan soo socda, aniga oo raacaya tusaalahan:

b. Tani waa feynuus. Kuwani waa feynuusyo.

t. Kani waa libaax. Kuwani waa \_\_\_\_\_.

j. Kuwani waa maroodiyaal. Kani waa \_\_\_\_\_.

x. Kuwani waa xafiisyo. Kani waa \_\_\_\_\_.

### Waxqabadka 4aad.

#### Yeeris


Macallinkeygu waxa uu ii yeerin doonaa weerahan hoos ku qoran.

Waxa aan ka bartaa diinta masaajid u dhow xaafaddeyda, waxaa kitaabka Qur'aanka noo fasira sheikh Cabdullahi, habeennada aan casharada tafsiirka Qur'aanka aan barto waa Sabti, Axad, Isniin, Talaado iyo Arbaco, waxa aan doonayaa in aan noqdo qof ku xeel dheeraado barashada diinta Islaamka haddii Allah (SW) uu ii ogolaado.

### Cutubka 2aad

#### Casharka 1aad: Ha i soo marin

Waxa aan fiirinayaa sawirka inta aanan akhrin sheekada, aniga oo sheegaya waxa aan ku arkay:



Beri baa wadaad ari yar meel baadiya ah ku haysta ayaa nin u soo martiyey.

Wadaadkii ninkii si fiican buu u soo dhaweeeyey, gogol wanaagsan ayuu geed u dhigay.

Wadaadku martigelinta ninka waxa uu ugu tala galay hilib, caano iyo bariis. Markii hore hilibkii ayuu u geeyay, markii uu soo noqday buu arkay ninkii oo hilibkii dhammeystay, misana caaniihii buu hor dhigay, markaas ayuu haddana gurigii ku noqday si uu bariiskii u soo qaado, markii uu soo noqday waxa uu arkay ninkii oo caaniihii dhammeestay, bariiskii buu hordhigay markaas ayuu bariiskii gebigiisiiba laba jeer qaatay.

Wadaadkii ninka cir weynidiisii iyo dhakhsihii uu wax u cunaayey ayaa fajac iyo yaab gelisey, markaas ayuu ku yiri:

Wadaadkii: war xaggee ayaad ku socotaa?

Ninkii: cisbitaalka magaalada

Wadaadkii: oo maxaa ka dooneysaa?

Ninkii: nin takhtar ah oo wanaagsan baa la iigu sheegay.

Wadaadkii: oo miyaad bugtaa?

Ninkii: haa

Wadaadkii: sidee laguu hayaa?

Ninkii: cuntada ayaanan si fiican u qaadan karin, waxa aan doonayaa in uu takhtarku uu i siiyo dawo cuntada ii furta.

Wadaadkii baa la yaabay, markaas ayuu ku yiri: "walaal waxa aan kaa codsanayaa in aanad i soo marin marka aad takhtarka ka soo noqtid ee ay cuntadu kuu furanto.

### Waxqabadka 1aad.

Waxa aan laba labo u jilaynaa sheekada wadaadka iyo ninkii martida ahaa.

### Waxqabadka 2aad.

Waxa aan koox-koox uga jawaabaynaa weydiimahan soo socda:

1. Wadaadku xaggee buu deggenaa?
2. Markii ugu horreysay maxaa uu wadaadku ninka u keenay?
3. Markii uu wadaadku caanaha keenay maxaa uu arkay?
4. Ninku xaggee buu ku socday? Maxaa uu ka doonayey?
5. Maxaa uu wadaadku ninka ka codsaday?

### Waxqabadka 3aad.

Waxa aan buuxinayaa meelaha bannaan:

1. Wadaadku ninka waxa uu ugu talagalay \_\_\_\_\_, \_\_\_\_\_ iyo \_\_\_\_\_
2. Ugu horreynii ninkii martida ahaa waxaa loo keenay \_\_\_\_\_
3. Wadaadkii ninkii ayuu caaniihii \_\_\_\_\_ dhigay.
4. Markii uu wadaadkii soo noqday waxa uu arkay ninkii oo \_\_\_\_\_ dhammeeyay.

## Waxqabadka 4aad.

Waxa aan akhrinayaa qoraalkan oo ay ku jirto "si", waxa aanna keenayaa shan weerood oo ay ku jirto "si".

### Erayga "Si" laba macno ayuu leeyahay:

1. Waxa uu muujiyaa ujeeddada wax la qabtay oo looga dan leeyahay, sida: Maxamed suuqii buu tegay si uu u arko aabbihi. "si" waxa ay caddeysay ujeeddada uu Maxamed ka lahaa tegista suuqa, taas oo ah in uu arko aabbihi.
2. sidoo kale "si" waxa ay la macna tahay hab ama dariiqo wax loo qabto, sida: Baruhu si fiican buu wax noogu dhigaa. "si" hadda waxa ay wax ka sheegaysaa sida baruhu ardayda wax ugu dhigo.

1. \_\_\_\_\_ 2. \_\_\_\_\_ 3. \_\_\_\_\_ 4. \_\_\_\_\_ 5. \_\_\_\_\_

## Layliyo

### Layliga 1aad:

Waxa aan buuxinayaa meelaha bannaan:

1. Wadaadkii aqalkii buu ku noqday si .....
2. Cali eray ayuu ku celceliyey si .....
3. Inantu waxa ay dooneysaa in ay dadaasho si .....
4. Arrintu sidaa ma'ahee waa si .....
5. Berri magaalada ayaan tegayaa si .....

### Layliga 2aad:

Erayadaan hoos ku qoran lidadkooda ayaan keenayaa aniga oo raacaya tusaalahan:

Tusaale: iftiin = mugdi:

horey, naceyb, weydiin, yar, caddaan, caafimaad, Seexo, kuleyl, xummaan, haa, cir.

### Layliga 3aad:

Erayadaan hoos ku qoran kuwo la mid ah ayaan keenayaa, aniga oo raacaya tusaalahan:

Tusaale: miyi = baadiyo

bare, maryo, jid, hooy, jiif, cudur, kac, i sii, caddaalad, toos, arag, ka tag.

### Layliga 4aad:

Erayada hoos ka xariiqan, kuwo la macno ah ayaan ku beddelayaa.

1. Yuusuf saaka wuu bukaa.
2. Markii uu caaniihii dhammeystay buu seexday.
3. Saaka xaggee ayaad tegeysaa?
4. Walaalkey waxa uu iga codsaday in aan ka aamuso marka uu wax gorayo.
5. Ardaygu waa in uu barihiisa xushmeeyaa.

**Casharka 2aad: Haddii aad tashan weydo  
waa laguu talin**



**Waxa aan akhrinayaa sheekadan, dabadeedna  
waan ka sheekeynayaa:**

Beri ayaa Laba bisadood waxa ay ku noolaayeen meel tuulo ah, waxa ay helaanna, waxa ay u qaybsan jireen si isle'eg, waayo waxa ay ahaayeen saaxiibbo isjecel.

Habeen habeennada ka mid ah, ayey hilib weyn ka soo qaateen kawaanka xoolaha lagu qalo, bisaduhu aad ayey u gaajaysnaayeen, mid walibana waxa ay dooneysay in ay tan kale khiyaaneyso, si keligeed hilibka ay cunto.

Waxaa labadii bisadood ka dhix dhashay is-afgaranwaa aad u xun, halkaasna waxaa ka bilawday dagaal ciddiyaha la isula tegey, oo ay midiba tan kale dhaawac halis ah u geysatey.

Haddaba markii ay hilibkii ku heshiin waayeen waxa ay gartii u dhiibteen daanyeer, si uu caddaalaad ugu qeybiyo hilibka.

**Maxaa uu sameeyey daanyeerkii?**

Daanyeerkii waxa uu soo qaatay miisaan iyo mindi, hilibkii ayuu saaray labadii kafadood, hadba kafadda cuslaata hilibka saaran ayuu cad ka goostaa oo uu cunaa, sidii uu hadba cad u goosanayey ayuu hilibkii dhammaystay.

Waxa uuna ku yiri labadii bisadood: "waxa aan ku dadaalaayey in aan midkiin sed bursan, si aen caddaaladda u ilaaliyo".

Labadii bisadood waxa ay garwaqsadeen in ay iyagu khaladka lahaayeen, oo haddii ay heshiin lahaayeen aan khasaaro soo gaarteen.

## Waxqabadka 1aad

Waxa aan ka jawaabayaa weydiimahan soo socda:

1. Maxa ay labada bisadood isku maan dhaafeen?
2. Goorma ayey garteen bisaduhu in ay khaldan yihii?
3. Maxaa uu daanyeerku sameeyey?
4. Immisa magac oo kale ayaad bisadda u taqaan?
5. Sidee ayaad u xallin lahayd khilaafka adiga iyo saaxiibkaa?
6. Maxaa aan sheekada ka baran karnaa?

## Waxqabadka 2aad

Waxa aan qorayaa erayadan lidadkooda:

|             |              |
|-------------|--------------|
| 1) faa'iido | 6) cir       |
| 2) su'aal   | 7) nolol     |
| 3) habeen   | 8) fulaynimo |
| 4) habaar   | 9) mugdi     |
| 5) horey    | 10) xanuun   |

## Waxqabadka 3aad

Waxa aan erayadan ku buuxinayaa meelaha bannaan:

|        |             |            |
|--------|-------------|------------|
| Faarax | canjeeladii | kabihii    |
| Wax    | beertii     | Sabuuradda |

1. Aamino \_\_\_\_\_ bey baraneysaa.
2. \_\_\_\_\_ geelii ayuu la jiraa maanta.
3. Sahro \_\_\_\_\_ bey dubeysaa.
4. Geeddi \_\_\_\_\_ buu soo abuuray.
5. Kuwani waa \_\_\_\_\_ hooyadeey.
6. Macallinku \_\_\_\_\_ ayuu wax ku qorayaa.

## Waxqabadka 4aad

Eray waydiimeedyadaan waxa aan ku buuxinayaa meelaha ay ku habboon yihii:

| Ma | Maxaa ay | Yaa | Halkee | Immisa | kuma | kuwee |
|----|----------|-----|--------|--------|------|-------|
|    |          |     |        |        |      |       |

1. \_\_\_\_\_ bisadood ayaa is dagaalay?
2. \_\_\_\_\_ isku dagaaleen?
3. \_\_\_\_\_ u garnaqay bisadaha?
4. \_\_\_\_\_ ku dirireen bisaduhu?
5. \_\_\_\_\_ qaateen gefkoodii?
6. \_\_\_\_\_ ah macallinkaaga?
7. \_\_\_\_\_ helay buugtaydii?



## Waxqabadka 5aad

### Yeeris:

Macallinkeyga ayaa ii yeerinaya weeraha soo socda:  
Jeermisku waa noolaha cudurrada u keena dadka  
iyo xoolaha, jeermisku waa noocyo badan yahay, nooc  
waliba waxa uu keenaa cudur gaar ah, cudurrada uu  
jeermisku keeno waa ay tiro badan yihiiin, waxaa ka mid  
ah: qaaxada, duumada, gooryaanada iwm.

## Waxqabadka 6aad

Magac u yaaladan ayaan ku buuxinayaa meelaha ay  
ku habboon yihiiin:

Isagu Iyagu Inagu Adigu Idinku Aniga Iyadu

1. Daahir ayaa maanta dhoofay, \_\_\_\_\_ Afgooye  
ayuu aadey.
2. Aamino riyihii ayey raacday, \_\_\_\_\_ galabta  
ayey imaanseysaa.
3. \_\_\_\_\_, waxa ay u baxeen si ay wax ugu soo bartaan  
dibadda.
4. \_\_\_\_\_ waxa aan ahay macallinkii Af-soomaaliga  
dhigi lahaa.
5. \_\_\_\_\_ waxa aad tahay saaxiibkay aan jeclahay.
6. \_\_\_\_\_ berri ayaad ku qoran tiihin wax soo jeedinta.
7. Habeen dambe \_\_\_\_\_ masjidka aan isugu imaanno.

## Waxqabadka 7aad

### Farqurxin

Waxa aan far qurxoon ku qorayaa afar jeer weertan

## Haddaad tashan weydo waa laguu talin


## Casharka 3aad: Deris wanaag

Sheekadaan ayaan akhrinayaa si aan uga jawaabo erayada la midabbeeyey ee ku jira qoraalka.

Abshiro waa hooyo  
naxariis badan oo deriska  
u roon, markii ay ka soo  
laabatay Xajka, waxa ay  
gacan u **fidisay**, dadkii ku  
noolaa xaafadda ay

degan tahay, kuwaas oo ay **u dhistay** dugsi Qur'aan  
oo ay wax ku bartaan carruur badan.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Xaajiyo Abshiro oo  
suuqa ka soo adeegatay, waxa ay aragtay aqal ay  
daaraddiisa haweeney ku uleyneyso wiil yar oo ay  
dhashay, isaguna uu markaas ku celcelinayo "hooyo  
macaaneey, hooyo Ruqiyoo". Xaajiyo Abshiro islaantii  
bay gacanta ka qabatay waxa ayna ku tiri: "Sheydaanka  
**iska naar** oo daa wiilka, maxaad u cigaabeysoo inanka  
yar?" **Ruqiya**: walaal waa gabar iyo laba wiil oo  
waqtigeyga inta badan waxa uu **ku lumay**, kala  
celintooda iyo korintooda, waayo aabbahood **waa uu**  
**geeriyyooday**. **Xaajiyo Abshiro**: miyaanay waxbarasho  
aadin ilmuu? **Hooyo Ruqiyoo**: maya, halkan ayey isaga  
cayaaraan.



**Xaajiyo Abshiro**: haddii aan dugsigan xaafadda ku  
yealla geeyo bal kawaran?

**Hooyo Ruqiyoo**: waxba kama qabo walaal, aadna  
waan ugu farxayaa".

**Xaajiyo Abshiro** ayaa ilmihi u sii kaxeeysay  
dugsiga Macallin Cali oo meeshaa ka dhawaa.

**Xaajiyo Abshiro**: Assalaamu-Caleykum macallin Cali.

**Macallin Cali**: Wacaleykumu-salaam **Xaajiyo Abshiro**".

**Xaajiyo Abshiro**: Macallimow, ilmahani waa agoon, waxa  
ayna la nool yihiin hooyadood oo dan-yar ah, waana  
deriska, waxa aan kuugu keenay in aad wax bartid,  
anigana aan bixiyo fariisinka iyo ujrada.

**Macallin Cali**: waan kaa yeelay waana ku mahadsan tahay  
waxa aadna tahay deris wanaagsan".

## Waxqabadka 1aad.

Waxa aan soo saarayaa erayada ka hadlaya falka tagey ee ku jira sheekada deris wanaaga, aniga oo raacaya tusaalahan:

- 1-.....
- 2-.....
- 3-.....
- 4-.....
- 5-.....

## Waxqabadka 2aad.

### Farqurxin

Waxa aan far qurxoon saddex jeer ku qorayaa weertan.

## Deris fiican deeq badan baa la dhaatsadaa

## Waxqabadka 3aad.

### Hal-xiraale

Waxa aad sheegtaa bahal, marka uu soconayo lix lugood ku socda, marna laba lugood iyo madaxa ku socda, marna duula.

Waxa aannu koox-koox isugu xiraneynaa hal xiraalahan hoos ku qoran, jawaabtana waxa aannu ka heleynaa sawirka iyo qoraalka isku qasan ee ku jira goobada.



## Shaandoor

## Waxqabadka 4aad.

Waxa aan weero gelinayaa erayadan hoos ku qoran: dugsi, deris, xaafad, ilmo, macallin.

1. Waxa aan dhigtaa dugsi hoose/dhexe.

2. ....

3. ....

4. ....

5. ....

## Waxqabadka 5aad.

Meelaha bannaan ayaan ku buuxinayaa erayadii aan ku soo bartay casharka, ka dibna buuggeyga ayaan ku qorayaa.

1. Maxaa aad u cigaabeysoo \_\_\_\_\_ yar?
2. Miyaanay \_\_\_\_\_ tegin ilmuu?
3. Wuxuu aad kuugu \_\_\_\_\_ in aad \_\_\_\_\_ bartid.
4. Wuxuu ayna la \_\_\_\_\_ hooyadood
5. Wuxuu aad tahay \_\_\_\_\_ wanaagsan.


## Waxqabadka 6aad.

Wuxuu aad ka jawaabayaa weydiimaha hoos ku qoran:

1. Maxaa ay Xaajiyoo Abshiro u qabatay dadkii ku noolaa xaafadda?
2. Waa maxay sababta ay Xaajiyoo Abshiro ugu soo leexatay hooyo Ruqiyoo?
3. Mee ilmaha Ruqiyaa aabbahood?
4. Immisa cunug ayaan loo geeyey macallin Cali?

## Casharka 4aad: Wanaagga Waalidka

Wuxuu aad akhrinayaa sheekadan, ka dibna wuxuu aad ka jawaabayaa weydiimahan ka dambeeyaa



Beri baa wuxuu jiray nin oday ah oo sabool ah, ilmihiisana wuxuu u sheegi jiray wuxuu wanaagsan, caruurta aabbahood wuxuu ugu wanaagsan oo ay ka dhaxleen wuxuu ay ahayd daacad-nimada iyo ilaalinta amaannada.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaan odaygii wuxuu u soo martiyey nin, ninkii ayaan ku yiri, "Adeer safar dheer ayaan u baxayaa, wuxuu aad kaa codsanayaa in aad ii haysid amaannadan inta ayaan ka soo noqonaayo." odaygii waa uuu ka aqbalay ninkii, in uuu amaannada u hayo.

Ninkii mudda dheer ayuu maqnaa, odaygii waa uuu gabobay, wuxuu u is yiri haddii aad dhimatid amaannadu waa dayacmeysaa, wuxuu uuna dhigay amaannadii meel isaga iyo wiilkiisa weyn ay ogyihiin, mudda ka dibna odaygii waa uuu geeriyooday amaannadiina waa uuu ka dardaarmy

Berigii dambe ayuu yimid ninkii amaannada lahaa, waxa uuna dadkii wareystay odaygii, waxaana lagu yiri, "ninkaasi waa hore ayuu geeriyoooday". Markii dambe waxa uu wareystay ilmihii uu odaygii geeriyoooday dhalay, waxa uuna weydiiyey in ay jiraan amaanno uu aabbahood kala dardaarmay, waxa ay u sheegeen in wiilka wayn lagala dardaarmay amaannadiisii.

Ninkii amaannada lahaa waxa uu la kulmay wiilkii curadka ahaa, si uu uga qaato amaannadii aabbihii ugu dhiibay, curadkii waxa uu isugu yeeray wiilashii kale oo ay wada dhasheen, waxa uuna u sheegay in aabbihii u dhiibay amaanno nin leeyahay oo waqtii dheerna ay ka soo wareegatay, wiilashii oo wada jooga ayaa amaannadii ninkii lahaa faraha laga saaray, ninkii amaannada lahaa waxa uu aad ula yaabay daacadnimada odaygii iyo ilmihiisa, sida ay amaannada ugu adkaayeen, ugu dambeyntiina waa uu u mahad naqay, waxa uuna ninkii amaannadii oo dahab aheyd kala bar siiyay ilmihi oo dayga ka dhintay, waxa ayna noqdeen dad hantiilayaal ah, waxa ayna abaalkaas ku gaareen wanaaggii aabbahood ay ka dhaxleen, illeen wanaagga aabbuu waa dhaxal keyd u ah ubadkiisa.

### Waxqabadka 1aad.

weydiimahan ayaan ka jawaabayaa, ka dibna buuggeyga ayaan ku qorayaa.

1- Odaygii yuu u dhiibay amaannadii?

2- Maxay ahayd amaannadu?

3- Muxuu sameeyey ninkii markii la siiyey amaannadii?

### Waxqabadka 2aad.

Waxa aan ku buuxinayaa meelaha bannaan erayada ku habboon.

1- Reerka odaygu waxa ay ahaayeen.....

2- Odaygu waxa uu caan ku ahaa.....

3- .....waxa uu u dhiibay alaab.....

4- Odaygii alaabtii.....

### Waxqabadka 3aad.

Waxa aan wadar ka sameynayaa oo aan weero galinayaa erayadaan soo socda, aniga oo raacaya tusaalahan:

1- nin: Nimanku wax bay qorayaan.

2- oday:.....

3- adeer .....

4- will .....

## Waxqabadka 4aad.

Waxa aan ka soo saarayaa sheekadan erayo tilmaamaya keliyo wadar.

1- .....

2- .....

3- .....

4- .....

## Waxqabadka 5aad.


### Farqurxin

Waxa aan far qurxoon ku qorayaa maahmaahdan.

## *Nin rag ahi waa rajo ku nool*

## Gasharka 5aad: Toddoba Nin

Waxa aan dhegeysanayaa sheekadan, ka dibna waxa aan sheegayaa iyada oo kooban:



Toddobo nin ayaa maalin israacday, markii ay wax badan socdeen ayey istaageen, mid ka mid ah ayaa yiri: "bal inna tiriya ma dhannahay?"

Nimanka waxa ay ogaaileen in ay toddobo ahaayeen markii ay magaalada ka soo dhaqaaleen, nin waliba mar ayuu tiriyey, midkasta oo tiriyan waxa uu ka dhigaa lix, waxa ayna la yaabeen sida ay toddobo nin u noqon waayeen, waxa ay ogaadeen in uusan qofna maqnayn, laakiin qof waliba oo tiriya waxa uu ilaawayey naftiisa.

Iyaga oo la yaaban ninka maqan, ayaa nin oday ah u yimid, waxa ayna ka codsadeen in uu tiriyo.